

# Haddii aad tahay qof heysta carruur billaabeysa fasalka xanaanada carruurta

2020-01-21

## Hadda waxaa la gaaray waqtigii la dooran lahaa iskuulka xilligiisa sanad dugsiyeedka dayrta ee 2020

Sanadkaan waxaa iskoollada degmooyinka laga billaabayaa doorasho iskuul oo ka billaabaneysa fasalka xanaanada carruurta, waa sistem cusub oo lagu bixiyo boosaska iskuullada. Haddii ey kuu joogaan carruur billaabeysa fasalka xanaanada carruurta xilliga sanad dugsiyeedka dayrta sanadka 2020 waxaad carruurtaada u codsaneysaa iskuul. Waa muhiim in aad adiga ka waalid ahaan sameyso doorasho rasmi ah. Waxaad codsigaaga ku aaddan iskuulka ku direysaa adeegga elektaroonigga ah ee loogu tala galay doorashada iskuulka lagana helayo bogga degmada [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval)

### **Waxaad dirreysaa codsigaaga ku aaddan iskuulka inta u dhexeysa 12 bisha febraayo iyo 26 bisha febraayo.**

Adeegga elektaroonigga ah wuxuu furmayaa 12 bisha febraayo wuxuuna xirmayaa 26 bisha febraayo 2020. Inta lagu guda jiro muddadaas waad geli kartaa adeegga elektaroonigga ah waxaadna gudbin kartaa codsigaaga ku aaddan iskuulka aad rabto. Marka aad geleyso adeegga elektaroonigga ah waxaad dalabkaaga ku saxiixee tusaale ahaan is sheegidda elektaroonigga sida adigoo isticmaalaya moobayl bank.id. Labada qof oo leh masuuliyadda sharciyeed ee carruurta waa in ey saxiixaan si uu dalabka sax u noqdo.

Waa muhiim in codsigaaga aad dhiibataa ugu dambeyn 26 bisha febraayo 2020. Waxaan ka duuleynaa codsigaaga inta ey macquulka tahay. Haddii aadan dalbasho iskuul oo rasmi ah sameyn waxuu cunugaaga boos ka heleyaa mid ka mid iskuullada ey boosaska ka bannaan yihiin ee degmada isla markaana ku yaalla meel masaafu macquul ah gurigaaga u jirta.

### **Jawaabta boosaska iskuulka la helay waxey imaaneyso bisha maarso 2020**

Bisha maarso waxaad heleysaa jawaab hordhac ah oo ku saabsan iskuulka uu cunugaaga boos ka helay. Jawaabta waxaa lagu soo daabacayaa adeegga elektaroonigga ee dalbashada iskuulka adigana waxaa kuu soo dhacaya sms ama iimeel marka lasoo jawaabo. Gal adeegga elektaroonigga si aad u akhrisato jawaabta. Jawaabta kama dambeysta ee ku saabsan iskuulka la geynayo guriga ayaa warqad ahaan laguugu soo dirayaa.

**Warbixin dheeraad ah ka akhriso [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval)**

Bogga internetka ee degmada waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan doorashada iskuulka ee fasalka xanaanada carruurta. Halkan waxaa tusaale ahaan yaal warbixin ku saabsan iskuullada degmeed ee ku yaal Norrköping iyo sharciyada kala-horreyn ee ka jira doorashada iskuul ee fasallada xanaanada carruurta.

**Su'aalo ma qabtaa ama caawimaad ma u baahan tahay?**

Booqo [www.norrkoping.se/skolval](http://www.norrkoping.se/skolval) si aad u akhrisato su'aalo iyo jawaabo. Waxaad kaloo su'aalahaaga ula tegi kartaa xarunta xiriirka ee degmada oo uu nambarkoodu yahay 011-15 00 00. Waxaad xattaa booqan kartaa xarunta xiriirka oo ku taal Trädgårdsgatan 21 ee Norrköping.

Waad ku mahadsantahay in aad dhiibaneysid codsigaaga iskuul.